

# Iska Ilaalinta Nacaybka

Dhacdooyinka nacaybka iyo dembiyada nacaybka waxay dhacaan marka dadku ay sameeyaan ficilo ku salaysan nacayb daran, caqiido kasoo horjeeda, ama cabsi aan sababaysnayn oo ku salaysan qof diintiisa dhabta ah ama diinta loo malaynayo inuu qabo, jinsiyadda, nooca galmada, aqoonsiga jinsiga, naafanimada, ku biiritaanka siyaasadeed, iyo/ama da'da. Dhacdooyinka nacaybka iyo dembiyada nacaybka ayaa badanaa dhaca kahor iyo kadib doorashooyinka qaranka iyo ka jawaabista dhacdooyinka caalamiga ah, oo ay ku jiraan dagaalka, colaadaha, iyo falalka argagixisada. Dadku waxay si toos ah ula kulmi karaan dhacdooyinka nacaybka ama dembiyada nacaybka, markhaati ayay ka noqon karaan, ama waxay arki karaan iyagoo isticmaalaya warbaahinta. Dhacdooyinka nacaybka iyo dembiyada nacaybka waxay beegsan karaan shakhsiyaad ama kooxo, ay ku jiraan bulshada ama xarumaha diinta.

Dhacdooyinka nacaybka waxa ay ku lug leeyihiin falal aan dembi ahayn oo uu nacaybku sabab u yahay.

Dembiyada nacaybka waa fal-dambiyeedyo oo uu sal u yahay nacaybka, sida hanjabaad afka ah oo waxyeello ah, weerar, ama kharribaad.

Dembiyada nacaybka iyo dhacdooyinka nacaybka waa khalad mana aha inay marna dhacaan. Si kastaba ha ahaatee, mararka qaarkood way dhacaan. Halkan waxaa ku qoran siyaabo aad gacan uga gaysan karto inaad naftaada iyo qoyskaagaba ilaaliso:

- Feejignow. Ka warqab agagaarkaaga.
- Ka fogow meelaha cidlada ah ama meelaha iftiinka ku yar yahay.
- Mar kasta oo ay suurtagal tahay, u safra labo-labo ama kooxo.
- Fariin u dir ama wac saaxiib, xubin qoyska ka tirsan marka aad ka tagayso ama aad timaado meel.
- Ogow sida loo wacayo 9-1-1. Haddii luqaddu ay caqabad kugu tahay, ogow sida loo codsado turjubaan.

## Haddii Aad La Kulanto ama Aad Markhaati Ka Noqoto Dembi Nacayb

Mararka qaarkood way adkaan kartaa in la ogaado in dembi nacayb uu dhacay. Haddii aad la kulanto ama aad markhaati ka noqoto xaalad aad u malaynayso inay dembi noqon karto oo aad u aragto inay ku salaysan tahay nacayb, eex, ama nacayb ku aadan koox gaar ah oo aad ka tirsan tahay, halkan waxaa ku qoran tillaabooyin aad qaadi karto:

**Mudnaanta Waxaad Siisaa Badbaadadaada**

- Iskaga tag aag kasta oo aan ammaan ahayn.
- Raadso daryeel caafimaad haddii loo baahdo.
- Qor ama qof u sheeg waxaad aragtay, erayada saxda ah ee la yiri, ama wixii xaqiiqooyin kale ah si aadan u iloobin.
- Dhacdooyinka ka dhaca goobaha internetka, sawiro ka qaad fariimaha.
- La xiriir qof aad ku kalsoon tahay si aad u hesho taageero.

### Tixgeli inaad ka Warbixiso Dembiga

- Wac 9-1-1.
- Haddii aad u baahan tahay turjumaad, sheeg magaca luqaddaada ama “Ingiriis kuma hadlo, waxaan ku hadlaa [your language].”
- Laamaha fulinta sharciga ayaa laga yaabaa inay kula soo xiriiraan si ay kuu weydiiyaan macluumaad dheeraad ah inta ay ku jiraan baaritaanka.

### Tixgeli inaad u sheegto FBI-da

- Xafiiska Baaritaanka ee Federaalka (FBI) ayaa kormeera dambiyada naca
- Onlayn: [tips.fbi.gov](https://tips.fbi.gov)
- Taleefanka: FBI-da ka wac 1-800-CALL-FBI (1-800-225-5324)



### Haddii aadan ku qanacsanayn inaad la xiriirto laamaha sharci fulinta ama aad u baahan tahay taageero dheeraad ah:

- La xiriir qof aad ku kalsoon tahay si aad u hesho taageero.
- Isticmaal khadka tooska ah ee Kheyraadka Nacaybka ama Eexda kaas oo bixiya dhageysi iyo agabyo taageero leh.
- La xiriir Xarunta Khayraadka Isku-xirka Dhibanayaasha laga helo 855-484-2846 ama <https://victimconnect.org/>



Haddii aad ka welwelsan tahay xaaladdaada socdaalka/qaxootinimada marka aad ka warbixinayso dembi, tixgeli inaad talo sharci ka raadsato qareenka socdaalka kahor intaadan ka warbixinin dembi. Sharciga socdaalka ee Maraykanka waxaa laga yaabaa inuu ilaaliyo dhibanayaasha la kulmay dambiyada qaarkood.

Haddii aad la kulanto dembi nacayb ama dhacdo nacayb, waa caadi inaad la kulanto falcelinno kala duwan, sida:

Caro	Taageero la'aan	Cabsi	Murugo	Niyad jab	Amni darro
Hurdo xumo	Madax xanuun	Ceeb	Walwal	Kalsooni hooseysa	Hubanti la'aan

Waxaa laga yaabaa inay ku caawiso inaad:

- Taageero ka raadsato dadka aad jeceshahay oo aad ku kalsoon tahay.
- Sameyso waxyaabaha kaa caawinaya inaad la qabsato xaalada, sida neefsasho qoto dheer, jimicsi, tukasho/Alla-baryi, iwm.

- **Xakameyso isticmaalka warbaahinta iyo baraha bulshada si aadan ula kulmin rabshado ama waxyaabo kale oo murugo kuu keenaya.**
- **Samaysato jadwal/hawlo, adigoo xaqiijinaya inaad seexato oo aad soo toosto isku wakhti maalin kasta.**
- **La xiriirto ururada bulshada ama machadyada caqiidada ku salaysan si aad taageero u hesho.**